

2019-2020

# Macluumaadka hawada xumaata ee PPS

## Gaadiidka Baska Yar iyo

### Isticmaalayaasha Adeegga Sedan

**Ku Socoto:** Waalidiinta ama masuuliyiinta ardayda adeegsata baska yar ama adeegyada Sedan ee Waxbarashada Qaaska ah

**Ka Socoto:** Gaadiidka Ardayda PPS

**Tixraac:** Macmuulaadka hawada xumaata ee sanad dugsiyeedka 2019-2020-ka

Qoraalkani wuxuu sharraxayaa sida Degmadu jawaab u bixin doonto inta lagu guda jiro hawada xumaatay iyo sida laga yaabo in adeegaaga ay u saameeyaan barafka, biyaha barafka noqda, ama xaalandaha hawada ee aan wanaagsanayn ee kale. Waxay sidoo kale tilmaantaa sida ay tahay in aad darawalka aad leedahay u wada qorshayn lahaydeen goob la joogsado oo beddel ah oo barafka loogu talagalay haddii goobtaada caadiga ah ee aad joogsato noqoto mid aad halis u ah inta lagu jiro hawada xumaatay.

Goobo kala duwan oo ka tirsan Portland waxaa soo gaara xaaladdo kala duwan oo adag oo hawada la xiriira iyada oo ay u wakan tahay jooga dhulka iyo cimilada badan. Xaaladan oo kale, kuwo ka mid ah dugsiyada waxaa laga yaabaa in ay ku shaqeeyaan wadooyinka barafka loogu talagalay halka dugsiyada kale laga yaabo in ay si caadi ah u sii shaqeeyaan. Waxaa intaa dheer, waxaa laga yaabaa in ay suuragal noqon waydo ama ammaan noqon waydo in darawalka aad leedahay uu ardaygaaga u qaado barnaamijiyadaadii joogtada ahaa ee la qorsheeyay, ama in uu isticmaalo goobtaadii caadiga ah ahayd ee aad joogsan jirtay.

Waxa cusub 2019-2020. Sahminta goobaha joogsiga ee barafka loogu talagalay looma dirayo dhammaan qoysaska sida caadiga ahayd dhawr qoysas kaliya ayaa leh dariiqyo halis ah oo keenayo in goob kale ee laga yeesho joogsi barafka awgii. Sahmintaan goobta joogtiga waxaa loo diri doonaa qoysaska horay oogu baahnaa goob joogsi ama ku nool meelo buuro ah. Ka hel inbadan oo ku saabsan tan bogga 2aad.

Wadooyinka barafka loogu talagalay iyo goobaha beddelka ah ee la joogsanayo waxaa lagu dhawaaqi doonaa SUBAXDII ama FIIDKII (ama labadoodaba) iyadoo ay ku xiran tahay xaalandaha wadada ama saadaasha hawada. Fadlan si dhow ula soco ogeysiisaya Degmada oo dheeraad ah inta lagu jiro maalintii kuwaasi oo loogu talagalay isbeddelada. Go'aanada Degmada ee la gaaray markii hadalkii hore lagu dhawaaqay ka dib waa laga cusboonaysiin doonaa dhammaan warbaahinta.

Haddii aad wax su'aalo ah qabtid fadlan soo wac ama emayl u dir.

Gaadiidka Ardayda PPS

716 NE Marine Dr. Portland, OR 97211

503-916-6901 Fakis: 503-916-2707 [transportation@pps.net](mailto:transportation@pps.net)



## Goobta la Joogsada ee barafka loogu talagalay

Wadooyinka ama laamiyada qaarkood waxay noqon karaan kuwo aad digaandig ama qatar ugu ah in ay ku socdaan baska yar oo jaalaha ah ama taksiga inta lagu jiro cimiladaaadka u qabow. Adiga iyo wadahaaga waxaad ka wada tashan kartaan si aad u go'aamisaan haddii aad u baahan tiihin meel kale oo aan ka fogeeyn dhowr baloog oo laga yaabo in ay ka habboon tahay xilliga hawada xumaata.

Waxaan samaynay foomka sahanka ee goob joogsi oo barafka loogu talagalay si loo diiwan galiiy loona dhaqan galiyo goobaha noqon karo joogsiyada barafka.

Dokumiintiyada Sahanka goobaha joogsiga barafka loogu talagalay waxaa toos loogu soo diri doonaa guryaha ku nool meelaha buuraha ah ama horay loogu aqoonsiday joogsi. Haddii aad isleedahay waad u baahantahay Sahminta goobta joogtiga barafka loogu talagalay ama aan laguu soo dirin fadlan ka dagso halkan <https://www.pps.net/Page/2237> ama darawalkaaga kala hadal walaacaaga.

Had iyo jeer, waxaad sidoo kale soo wici kartaa Gaadiidka Ardayda si aad u joojiso adeegga inta lagu jiro hawada xun.

Haddii aad ku nooshahay dariiq ama wado weyn oo amni la'aan noqoneysa inta lagu jiro hawada xun, fadlan samee waxyaabaha soo socda:

1. Darawalka aad leedahay kala hadal helitaanka, in goob lagu heshiiyay oo la joogsado oo beddel ah oo barafka loogu talagalay ah oo la iska qaado isla markaana la isku dejijo oo u dhow goobtaada caadiga ah ee aad joogsato;
2. Buuxi oo soo gudbi foomkan: <http://www.pps.net/Page/2237> Dooro Ikhtiyaarka 2, iyada oo la sugayo oggolaanshaha Degmada, baskaasu wuxuu ardaygaaga ka qaadi doonaa sidoo kalena ku dejin doontaa goobtaasi.

Haddii aad is leedahay uma baahnid goob la joogsado oo beddel ah oo barafka loogu talagalay, ka dib buuxi ra'yi ururinta isla markaana dooro Doorashada 1 (ma jiro isbeddel ku yimid goobta la joogsanayo ee la iska qaado/la isku dejijo).

Goobaha lagu heshiiyay oo la joogsado oo beddel ah oo barafka loogu talagalay ah ee la iska qaado/la isku dejijo waxaa la isticmaali doonaa kaliya marka Degmadu si rasmi ah ugu dhawaadqo in Wadooyinka Barafka Loogu Talagalay ay yihiin kuwo dhaqan gal ah looguna talagalay isqaadista SUBAXDII iyo/ama isdejinta FIIDKII.

Haddii aad go'aansato in aad joojiso adeegga gaadiidka ee ardaygaaga inta lagu jiro dhacdo markaa wac 503-916-6901 waxaanad doorataa kuwa la kala doorayo ee #3. Fadlan waxaad u dhaaftaa farriin waxaanad raacisaaa magaca ardaygaaga, higaadi magaciisa dambe, dugsiga, iyo lambarka jidka uu maro basku haddii uu jiro.

## **ENGLISH**

This information is very important. If you are unable to read it, please have someone explain it to you in a language you understand, or contact your school.

## **SPANISH**

Esta información es muy importante. Si usted no es capaz de leerlo, por favor obtenga a alguien que se lo explique en un idioma que usted pueda entender, o llame al 503-916-3582.

## **RUSSIAN**

Эта информация очень важна. Если вы не можете прочитать это, пожалуйста, попросите кого-нибудь, чтобы вам объяснили это на родном языке или вы можете позвонить по телефону 503-916-3583.

## **VIETNAMESE**

Tài liệu này rất quan trọng. Nếu quý vị không đọc được tài liệu này, xin vui lòng nhờ người quen giải thích bằng ngôn ngữ mà quý vị có thể hiểu được, hoặc gọi điện thoại số 503-916-3584.

## **CHINESE**

這些資訊是很重要的。如果你不懂得它的英文意思，請找某人用你瞭解的語言為你解釋，或打電話 503-916-3585.

## **SOOMAALI**

Macluumaadkan aad buu muhim u yahay. Hadii aadan akhrin Karin, fadkan raadso qof kuugu faahfaahiya luqad aad fahmayso, ama la xidhiidh dugsigaaga 503-916-3586.

Dugsiyada Dadweynaha Portland wey aqoonsan yihiin kala duwanaanshaha iyo qiimaha ay leeyihiin dadka oo dhan iyo kooxaha iyo doorka ay ku leeyihiin bulshada. Dhammaan dadka iyo kooxaha oo dhan waxaa loola dhaqmi doonaa si caddaalad leh marka ay noqoto dhammaan hawlahaa, barnaamijyada, iyo hawlgalada, iyadoo aan la eegaynin da'ada, midabka, caqiqada, naafanimada, xaalada guur, dalka laga soo jeedo, jinsiyada, diinta, lab ama dhigid ama dookha galmo. Guddiga Siyaasadda Waxbarashada 1.80.020-P

# Ogaysiiska & Hab-raaca Hawada Xumaata

## Helidda War Degdeg ah – Dakhso ah

PPS waxay ka shaqaysaa in ogeysiis yada la xiriira xiritaanka ama dib u dhaca ay qoysasku u helaan si dakhso ah oo cad. Iyada oo ay dheer tahay wargelinta warbaahinta, waxaynu isticmaalnaa:

- **Nidaam wicitaan telefoon otomaatig ah:** Oo Ingiriisi ah iyo luuqaddo la taageerayo oo loo dirayo lambarka rasmiga ah ee ku qoran foomka diiwaan gelinta ardayga. Waad beddeli kartaa lambarka telefoonka adiga oo sii maraya xoghayaha dugsigaaga.
- **Internet-ka oo la soo geliyo:** Halka ay ku qoran tahay “alert pod” ee [www.pps.net](http://www.pps.net) iyo dhammaan website-yada dugsiyada.
- **Tuwiitar:** Nagala soco @PPSConnect.
- **Feesbuug:** Nagala soqo [www.facebook.com/pps.homepage](https://www.facebook.com/pps.homepage)
- **Fariin dirid:** Isku diiwaan gelinta fariin dirista ee loogu talagalay Fariin Qaadaha Dugsiga adiga oo fariin ku diraya HAA una diraya 68453

Badbaadadu waa muhiimada ugu weyn inta lagu jiro xaaladaha hawadu xumaato.

**Waxyaabaha aad u baahan tahay in aad ogagto:**

- Ku dhawaaqidda wadooyinka barafka loogu talagalay waxaa laga yaabaa in ay weheliso 2 saacadood oo dib loo dhigo furitaanka, ama xiritaan wakhti hore la xirayo. Baska wuxuu raaci doonaa sida ku haboon waqtiyada dambe ee dugsiga la furayo iyo waqtiyada hore ee dugsiga laga baxayo;
- Marka ay dhacdo in ay PPS ku dhawaaqdo in 2 saacadood oo dib loo dhigay furitaanka maalin uu dugsigaaga jadwalka gashaday in ay noqoto maalin dib loo dhigayo furitaanka, dugsigaaga wuxuu bilaabmi doonaa 2 saacadood ka dib wakhtigaagii caadiga ah ee dawanka/jalasku dhici jiray – maaha 2 saacadood ka dib wakhtiga dib loo dhigay furitaanka;
- Ardayda waa in ay basaska ku sugaan masaafu ammaan ah oo wadada ka shishaysa inta lagu jiro xaaladaha hawadu xumaato;
- Suurtagal maaha in ay jiraan wakhtiyoo sax ah oo meesha la joogsanayo inta lagu jiro maalmaha barafku da’ayo iyadoo ay ugu wacan tahay dib u dhaca aan la saadaalin karin ee isku socodka gaadiidka, ardaydu waa in ay waqtii hore joogaan meelaha la joogsado ee barafka loogu talagalay;
- Ardaydu waa in ay si diiran u labistaan isla markaana u diyaar garoobaan wakhtiyoo dheeraad ah oo dibada la joogayo maalmahani;

- Waalidiinta ayaa mas'uul ka ah ammaanka ardayda joogta goobaha basku joogsado, waana in ay carruurtooda u tilmaamaan socodka badbaadada leh iyo nidaamyada sugitaanka la xiriira;
- Basaska waxaa ku rakiban raadiyaha la iskala hadlo waxayna sidoo kale ku qalabaysan yihiin taayirada cimilooinka kala duwan oo dhan loogu tala-galay iyo silsilado;
- Iisticmaal meel-qabsiga marka aad soo fulasyid ama aad ka dagaysid bas-ka si aadna u simbiririxoon.
- Ha ku istaagin hana ku cayaarin barafka tuuran Goobta joogsiga baska. Ha ku tuurin barafka gaariga ama dadka.
- Marna ha isku dayin inaad soo qaadato alaab kaaga dhacday aagga ama hoosta baska. Taa badalkeed, mar waliba ogaysii dhacdadaa oo kale dara-walka baska.
- Marna ha ka daba ordin baska ama ha daba qabsan.

Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, fadlan la xiriir Gaadiidka Ardayda 503-916-6901, ama emayl u dir:[transportation@pps.net](mailto:transportation@pps.net).

# Xaaladaha xumaatada hawada ee PPS

## FURITAANKA JOOGTADA AH EE WADOOYINKA BARAFKA LOOGU TALAGALAY

	FARIINTA WARBAAHINTA	FARIIN QEEEXAN
1a	Furitaanka Caadiga ah ee PPS. Dugsiyada gaarka ah ee wadada barafka loogu talagalay.	<ul style="list-style-type: none"> <li>Ardaydu waxay imanayaan wakhtigii caadiga ahaa.</li> <li>Dhammaan dhismaha PPS way furan yihiin.</li> <li>Adeega baska ee dugsiyo gaar ah ayaa isticmaalaayaan wadooyinka barafka loogu talagalay.</li> <li>Barnaamijiyada dugsiga ka dib iyo maalinta la kordhiyay waxay shaqaynayaan gaadiid la'aan.</li> </ul>
1b	Furitaanka Caadiga ah ee PPS. Dhammaan basaska waxay isticmaalaayaan wadooyinka barafka loogu talagalay.	<ul style="list-style-type: none"> <li>Ardaydu waxay imanayaan wakhtigii caadiga ahaa.</li> <li>Dhammaan dhismaha PPS way furan yihiin.</li> <li>Dhammaan basaska waxay isticmaalaayaan wadooyinka barafka loogu talagalay.</li> <li>Barnaamijiyada dugsiga ka dib iyo maalinta la kordhiyay waxay shaqaynayaan gaadiid la'aan.</li> </ul>

## 2 SAACADOOD OO FURITAANKA DIB LOO DHIGAY

	FARIINTA WARBAAHINTA	FARIIN QEEEXAN
2a	Dugsiyo gaar ah oo ay leedahay PPS 2 saacadood aaya dib loo dhigay. Dhammaan basaska waxay isticmaalaayaan wadooyinka barafka loogu talagalay.	<ul style="list-style-type: none"> <li>Ardayda dhigata dugsiyo gaar ah ama dhammaan dugsiyadu waxay yimaadaan (2) saacadood ka dib marka loo eego wakhtigii caadiga ahaa.</li> <li>Dhammaan dhismaha PPS way furan yihiin.</li> <li>Dhammaan basaska waxay isticmaalaayaan wadooyinka barafka loogu talagalay.</li> <li>Ku dejintii wakhti hore lagu dejinayay ardayda ee dugsiga xanaanada ubadka waa la baajiyay.</li> <li>Dugsiga xanaanada ubadka "Kindergarten" ee SUBAXDII waa la baajiyay.</li> <li>Fasalada dugsiga AXADA ee SUBAXDII la aado waa la baajiyay.</li> <li>Fasalada maalinta nuskeed iyo bartamaha maalintii la dhigto waxay shaqaynayaan iyadoo aanay jirin gaadiid dugsiga kuu qaadaya.</li> <li>Barnaamijiyada dugsiga ka dib iyo maalinta la kordhiyay waxay shaqaynayaan gaadiid la'aan.</li> </ul>
2b	<b>AMA</b>  Dhammaan PPS aaya 2 saacadood dib loo dhigay.  <b>AMA</b>  Dhammaan PPS aaya 2 saacadood dib loo dhigay.	<ul style="list-style-type: none"> <li>Ardayda dhigata dugsiyo gaar ah ama dhammaan dugsiyadu waxay yimaadaan (2) saacadood ka dib marka loo eego wakhtigii caadiga ahaa.</li> <li>Dhammaan dhismaha PPS way furan yihiin.</li> <li>Ku dejintii wakhti hore lagu dejinayay ardayda ee dugsiga xanaanada ubadka waa la baajiyay.</li> <li>Fasalada dugsiga AXADA ee SUBAXDII la aado waa la baajiyay.</li> <li>Dugsiga xanaanada ubadka "Kindergarten" ee SUBAXDII waa la baajiyay.</li> <li>Fasalada maalinta nuskeed iyo bartamaha maalintii la dhigto waxay shaqaynayaan iyadoo aanay jirin gaadiid dugsiga kuu qaadaya.</li> <li>Barnaamijiyada dugsiga ka dib iyo maalinta la kordhiyay waxay shaqaynayaan gaadiid la'aan.</li> </ul>
2c	Dugsiyo gaar ah oo ay leedahay PPS ayaa 2 saacadood dib loo dhigay.	<ul style="list-style-type: none"> <li>Ardayda dhigata dugsiyo gaar ah ama dhammaan dugsiyadu waxay yimaadaan (2) saacadood ka dib marka loo eego wakhtigii caadiga ahaa.</li> <li>Dhammaan dhismaha PPS way furan yihiin.</li> <li>Ku dejintii wakhti hore lagu dejinayay ardayda ee dugsiga xanaanada ubadka waa la baajiyay.</li> <li>Fasalada dugsiga AXADA ee SUBAXDII la aado waa la baajiyay.</li> <li>Dugsiga xanaanada ubadka "Kindergarten" ee SUBAXDII waa la baajiyay.</li> <li>Fasalada maalinta nuskeed iyo bartamaha maalintii la dhigto waxay shaqaynayaan iyadoo aanay jirin gaadiid dugsiga kuu qaadaya.</li> <li>Barnaamijiyada dugsiga ka dib iyo maalinta la kordhiyay waxay shaqaynayaan gaadiid la'aan.</li> </ul>
2d	<b>AMA</b>  Dhammaan PPS aaya 2 saacadood dib loo dhigay.	<ul style="list-style-type: none"> <li>Ardayda dhigata dugsiyo gaar ah ama dhammaan dugsiyadu waxay yimaadaan (2) saacadood ka dib marka loo eego wakhtigii caadiga ahaa.</li> <li>Dhammaan dhismaha PPS way furan yihiin.</li> <li>Ku dejintii wakhti hore lagu dejinayay ardayda ee dugsiga xanaanada ubadka waa la baajiyay.</li> <li>Fasalada dugsiga AXADA ee SUBAXDII la aado waa la baajiyay.</li> <li>Dugsiga xanaanada ubadka "Kindergarten" ee SUBAXDII waa la baajiyay.</li> <li>Fasalada maalinta nuskeed iyo bartamaha maalintii la dhigto waxay shaqaynayaan iyadoo aanay jirin gaadiid dugsiga kuu qaadaya.</li> <li>Barnaamijiyada dugsiga ka dib iyo maalinta la kordhiyay waxay shaqaynayaan gaadiid la'aan.</li> </ul>

## XIRITAANKA

	FARIINTA WARBAAHINTA	FARIIN QEEEXAN
3a	Dugsiyo gaar ah oo ay leedahay PPS aaya xiran. Dhammaan basaska waxay isticmaalaayaan wadooyinka barafka loogu talagalay.	<ul style="list-style-type: none"> <li>Ardayda ka socota <u>Dugsiyo gaar ah</u> guriga ayay iska joogaan.</li> <li><u>Dhismayaal gaar ah</u> oo dugsiga ka tirsan aaya xiran.</li> <li>Dhammaan basaska waxay isticmaalaayaan wadooyinka barafka loogu talagalay.</li> <li>Barnaamijiyada dugsiga ka dib iyo maalinta la kordhiyay ee dugsiyada furan waxay shaqaynayaan gaadiid la'aan.</li> </ul>
3b	Dugsiyo gaar ah oo ay leedahay PPS aaya xiran.	<ul style="list-style-type: none"> <li>Ardayda ka socota dugsiyo gaar ah guriga ayay iska joogaan.</li> <li>Dhismayaal gaar ah oo dugsiga ka tirsan aaya xiran.</li> </ul>
3c	Dugsiyada PPS way xiran yihiin. Xafisiyada way furanyihiin.	<ul style="list-style-type: none"> <li>Ardada gurigay joogayaan.</li> <li>Dhammaan dhismayaasha dugsiga yaa xiran.</li> <li>Xafiska dhexe ayaa furan.</li> <li>Rice wuu furan yahay.</li> <li>Gaadiidku way furan yihiin.</li> </ul>
3d	Dhammaan PPS way xiran yihiin	<ul style="list-style-type: none"> <li>Ardada gurigay joogayaan.</li> <li>Dhammaan dhismayaasha dugsiga yaa xiran.</li> <li>Xafisiyada way furanyihiin.</li> </ul>

## HAWLAHA GALABTII LOOGU TALAGALAY IYO DHACDOOYINKA WAA LA BAAJIYAY

	FARIINTA WARBAAHINTA	FARIIN QEEEXAN
4	Hawlaho galabtii loogu talagalay ee PPS iyo dhacdooyinka waa la baajiyay.	<ul style="list-style-type: none"> <li>Dhammaan hawlaho galabtii loogu talagalay, dhacdooyinka, iyo tababarada PPS waa la baajiyay.</li> <li>Fasalada fiidkii la dhigto ee lagu qabto dhismaha Benson waa la baajiyay.</li> </ul>

# Xaaldaha xumaatada hawada ee PPS

*Si ula kac ahaa loo baneeyay.*

# MIYAAD noqon kartaa Darawal Baska Dugsiga ah?

Gaadiidka Ardayga ee Portland Public Schools waxay shaqaaleysiinayaan darawala-da basaska dugsiga oo degmada u shaqeeya, oo inta badan bixinaya adeegga basaska yar-yar ee ku aadan qoysaska ardayda qabta baahiyaha gaarka ah.

## PPS WAXAY BIXISAA:

- Qorshaha Caafimaadka/Ilkaha/Aragga oo Wanaagsan
- shaqee 10 bilood, iyada oo bixisa inka badan 12 kala doorasho oo lacag siin ah
- 7 fasax oo lacag lagugu siinayo sanadkiiba
- Qorshaha Hawlgabnimada PERS OPSRP

Booska la cadeeyay, Ururku Shaqaaluhu  
Wakiil ka yahay  
Maalmaha Shaqada: 180

Ka codso halkan <https://www.pps.net/Page/2158>

Darawalka Baska Dugsigu waa in uu mas'ul ka ahaadaa ku hawlgalka badbaadada iyo wax ku oolka ah ee wadooyinka baska dugsigu maro ee maalin kasta la quondeeyay, iyo/ama socodka dheeraadka ah. Waxqabadka shaqada la xiriira hadba sida uu u quondeeyo Kormeeraha Darawalka.

Aqoonta Ugu yar ee La Iskaga Baahan Yahay: In ugu yaraan 18 jir aad ahaato. In laga gudbaa baaritaanka jireed. In laga gudbaa baaritaanka taariikh dambiyedka. La yeeshaa taariikhda gaari wadida oo nadiif ah. Awood lagu helayo sharciga CDL iyo in la dhammaysto tababarka darawalka ayay u baahan tahay Waaxda Waxbarashada ee Oregon, oo ay ka mid tahay baaritaanka dhaqdhaqaqa jireed.



*Mustaqbal  
Kaan U Soconaa*

## Mushahaarka Lagu Bilaa-bayo: \$19.15 6 saacadood ayaa hubaal ah in la shaqeeyo

Si aad u codsato, waxaad gashaa website-ka  
PPS: [www.pps.net](http://www.pps.net)

Guji halka linkiga ay ku qoran tahay "Job" ee ku taala bogga ugu horeeyo.

Guji sanduuqa ay ku qoran tahay "New Applicants".

Guji "Search Jobs Now"

Raadi liiska shaqada ee cinwaankeedu yahay "Student Transportation-School Bus Driver" isla markaana guji liiska ciwaanka shaqada.

Ka dib marka aad akhriso sharaxaadda shaqada, guji badhanka ay ku qoran tahay "Apply."

Guji halka ay ku qoran tahay "Register Now" si aad u bilowdo sharaxaada codsiga ee ku qoran website-ka PPS, ama raac tilmaamaha beddelka ah haddii aad hore u isticmaashay nidaamka codsiga ee PPS.

Sii wad hab-raaca codsiga, adiga oo dhamaameystiraya dhamaan qaybaha ay ka kooban tahay qaybta "My Application".

Haddii codsigaagu dhamaameystiran yahay oo aad codsatay shaqada adiga oo isticmaalaya website-ka, waxaad wicitaan telefoon ka heli doontaa Waaxda Gaadiidka Ardayga marka codsigaaga dib loo eego.

